

Hawsha:

Dugsiga Opal wuxuu xoojinayaa waxbarashada isaga oo kicinaya dareenka ee fikradaha cusub ee ku saabsan jawi abuurka halkaasi oo hal-abuurnimada, xiisaha iyo la yaabka waxbarasho uu kobco.

Dugsiga Opal waa urur mid bixiya fursado laga wada siman yahay oo aanan qofna takoorayn iyadoo ay la xiriirto asalka, jinsiyada, dookha galmo, da'da, diinta, xaalada guur, dalka laga soo jeedo, ama naafanimada maskaxeed ama jireed.

Opal School
4015 SW Canyon Rd.
Portland, OR 97221

Telefoonka: 503-471-9917
Fax-ka: 503-223-6600
E-mail-ka: office@opalschool.org

Ku soo dhowow Dugsiga Opal



*oo ah dugsiga dadweynaha
oo madax bannaan ee
PPS iyo barnaamij ka
mid ah Madxafka
Carruurta ee Portland*

Opal School
4015 SW Canyon Rd.
Portland, OR 97221

503-471-9917
office@opalschool.org
www.portlandcm.org/opalschool

Ilmuhu wuxuu leeyahay boqolaal luqaddood, boqolaal gacmood, boqolaal fikradood, boqolaal siyaabood oo uu ku fikiro, ku ciyaaro, ku hadlo... iyo boqolaal, boqolaal kale oo dheeraad ah.

—Loris Malaguzzi

Sababta loo dooranayo Dugjisa Opal?

La aasaasay & Isku xiran:

Oo kobcay tan iyo 2001-kii isaga oo ah barnaamij ka mid ah Madxafka Carruurta ee Portland

Degdeg wax u fahma & Isku dhow:

88 arday ayaa ku tirsan kindergarten oo ah ilaa heerka fasalka shanaad

Dhaqan Wax isweydiin Ciyaareed leh:

Ay dhiirigeliyeen dugsiyada Reggio Emilia

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah booqo opalschool.org

Ma daneynaysaa in aad isqorto?

Fadlan wac 503-471-9917 wixii macluumaad ah.

Khibradda Waxbarasho oo Kala duwan

Opal School

- Wuxuu leeyahay muuqaal awooda leh oo ah in DHAMMAAN carruurta yaryar in ay yihiin kuwo caqli badan leh, hal-abuur leh isla markaana leh karti leh iyaga oo leh karaamada iyo kartida ay dunidu u baahan tahay.
- Wuxuu qiimeeyaa isla markaana ixtiraamaa dhammaan qoysasku in ay yihiin kuwo iskaashi wax la yeelanaya kuwaasi oo gacan ka geysta khibradaha kala duwan iyo xikmadda.
- Wuxuu abuuraa bulsho waxbaraysa oo ah carruurta, qoysas iyo shaqaale abaabula shaqadooda iyada oo midba mid kale dhageysanayo.
- Wuxuu farshaxanka u isticmaala luqaddo ahaan si uu u dhiirigeliyo, hal-abuurnimada, aragtida iyo wada xiriirka.
- Wuxuu fiiro gaar ah siiyaan istiraatiijiyado waxbarasho oo dabiici oo ay carruurta isticmaalaan si uu macno ugu sameeyo adduunka ku wareegsani.
- Wuxuu u shaqeeyaa sidii sheybaar waxbarasho oo kale kaasi loogu talagalay horumarinta xirfadeed ee kumaan macallimiin ah oo ka kala socda adduunka oo dhan.



Waa maxay dugsiyada madaxa bannaani?

Dugsiyada madaxa bannaani waa dugsiyo dadweyne oo loogu talagalay in ay bixiyaan barnaamijyo casri oo leh falsafado waxbarasho oo gaar ah iyo/ama bixinta tusaalooyin laga helayo fursado dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska ka tirsan nidaamka dugsiyada dadweynaha. Dugsiyada madax bannaani waa urur ah 501(c)3 oo qandaraas la gala Dugsiyada Dadweynaha Portland si ay u damaanad qaadaan isla markaana u dhowraan madax bannaani heerkoodu sareeyo taasi oo lagu beddelanayo isla xisaabtanka la kordhiyay. Dugsiyada madax bannaani waxaa lagu maamulaa Xeerka La Casriyeeyay ee Oregon (ORS) 338.

Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dugsiyada madaxa bannaani iyo PSS?

PPS ayaa ka mas'uul ah kor kala socoshada iyo kormeerka dhammaan dugsiyada madaxa bannaani ee ay damaanad qaaday degmadu. PPS waxay ururisaa waxyaabaha sanadlaha ah ee la iskaga baahan yahay in la bixiyo, waxay la socotaa xasiloonaada maaliyadeed iyo waxqabadka ardayga, waxayna hubisaa in dugsiyada madaxa bannaani uu u hoggaansan yahay sharciyada iyo heshiiska.

Sidee ayuu ardaygu isku qoraa dugsiyada madaxa bannaani?

Isqorista dugsiyada madaxa bannaani waa in ay ahaataa mid caddaalad ah isla markaana loo siman yahay, waxaana laga yaabaa in ay ku kooban tahay da'da ardayga, heerka fasalka ee ardayga, iyo booska bannaani ee jira. Haddii dugsiyada madaxa bannaani uu helo codsiyo ka badan booska bannaani ee jira marka la eego heerka fasalka/fasalka la joogo, markaasi waa in loo sameeyaa bakhtiyaanasiib loo siman yahay si loo go'aamiyo isqorista heerka fasalka/fasalka la joogo.